

Rifampin (RMP)

Somali



Buugga tilmaamaha dawooyinka (TB da)

Waa maxay Rifampin?

Rifampin (RMP) waa dawo antibiotik ah ee lagu daweyo cudurka qaaxada (TB). Laba siyaalod ayaa loo isticmaalaa:

1. In lagu dilo jeermiga TB da ee cudurka keena (marka lala qaato dawooyin kale)
2. In lagu dilo jeermiska hurda ee TB da mararka qaarkood

Jeermiska TB da waa mid dhib badan sida loo daweyyana adagtahay. Waa in aad qaadataa dawadan mudo lix ilaa laba iyo toban bilood ah si loo cirib tiro jeermiska TB da. Takhtarkaada ayaa go'aaminaayo inta billod aad qaadanaysid dawada.

Sidee baan u qaataa dawadan?

- Waa muhim in aad maalin kasta qaadado dawada **ama** sida uu takhtarkaada ku faray
- **Isla markiiba ogeysii takhtarkaada marka aad joojiso qaadashada dawada**
- Hadii aad ilowdo qaadashada qeyb dawo ah, qaado sida ugu dhaqsiiyaha badan adigoona marna laba qeyb isku qaadan hal mar
- Isku day in aad qaadato dawada adoo gaajoon. Hadii ay kaa dhibto caloosha qaado marka aad wax cuntid ka dib
- Ku keydi dawada RMP da meel qabow oo qalalan

HA CABIN QAMRO inta aad qaadanaysid dawadan. Waxaad dhaawici kartaa beerkaada.

- La socodsii takhtarkaada dawooyinka kale ee aad qaadatid ama kuwa aad hadda bilowday
- Kaniiniga ka hortagga dhalimada waxtar in uusan **yeelan** ayaa laga yaabaa kolka aad qaadanaysid dawadan
- Hadii aad xaamilo tahay ama aad ilmo nuujinaysid la tasho takhtarkaada inta aadan qaadan dawadan
- Ha gelin indhaha quraaradda yar ee aragtida inta aad qaadanaysid dawadan

Waa kuwee calaamooyinka aan iska jiraayo?

- Dadka sida ay u badanyihiin kuma dhibtodaan dawadan RMP da
- Waxaad u baahantahay in uu takhtarkaadu si joogta ah kuula socdo inta aad qaadanaysid dawada RMP da
- **Calaamadaha caadi ga ah ee leysku arko waxaa ka mid ah:**
 - Calool xanuun
 - Candhuufta ama ilinta oo huruud ama guduud noqota
 - kaadida, saxarada (dhibaato ma leh)
 - Nabro yar yar oo cun-cun leh oo jirka ka soo yaaca
 - Calaamado hargab u eg (qandho, qar- qaryo, wareer, neefta oo kugu dhegta)
- **Hadii aad isku aragtid calaamadahan qaarkood ee qatarta ah, jooji dawada takhtarkana la xiriir**
 - Caajis/ daal fara badan
 - Labbo-labbo/ matag
 - Calool xanuun
 - Raashiin xumo
 - Jirka ama indhaha oo huruud noqda
 - Kaadi aad u calawsan
 - Saddex cisho ama ka badan oo qandho ku qabata

Habka dawada TB da loo qaato

- Qaado dawada waqti go'an maalin kasta, sida:
 - Inta aadan jiifsan
 - Marka ugu horeeysa ee aad hurdada ka kacdid
- Isticmaal gasaca lagu qeybiyo daawada oo todobaadle ah
- Maalin kasta ee aad qaadatid kaniiniga ku calaamadeyso buuga jadwalka taariikhda
- Weydiiso qof qoyska ka mid ah ama saaxibkaa in uu ku xasuusiyo
- Tix gelin siin raacidda barnaamijka Hubinta Qaadashada Dawada (DOT)

Hadii aad wax su'aal ah ka qabtid dawooyinkaada ama TB da fadhlana la xiriir takhtarkaada ama Toronto Public Health oo laga helo **416-338-7600**

E-mail: targettb@toronto.ca

Web site: www.toronto.ca/health/tb_prevention

